# XEERARKA UGAARSIGA OORSATADA EE 2023

Fadlan xeerarkan soo socota si taxaddar leh u akhri. Waxay ka hadli doonaan

- U QALMISTA, NOOCYADA SHATIGA, IYO KHIDMADDA SHATIGA
- XUDUUDAHA AAGGA OGOLAANSHAHA
- SOO DABISTA OORSATADA
- DAASASKA LA QAADI KARO EE AAGAGA MAAREYNTA DUURJOOGTA (WMAs)
- TAARIIKHAHA XIILIYADA, SAACADAHA TOOGASHADA, IYO XADADKA BOORSADA
- MAMNUUCYADA KALE
- CALAAMADEYNTA, DIIWAANGELINTA, & SOO GUDBINTA ILIGA OORSATADA
- OORSATOOYINKA FAWDADA AH
- HAGITAANADA/ DUKAAMADA OORSATADA
- RUKHSADAHA DHOOFINTA EE CITES
- BAABUURTA RAFKA (OHVS), OO AY KU JIRAAN KUWA MARI KARA BANNAANKA IYO BUURAHA (ATVS)

Intaas waxa dheer, xeerarka ugaarsiga guud, hubka sharciga ah, iyo qaansooyinka iyo leebabka (qaanso isku-tallaabyadu sidoo kale waa sharci) ee loo ogol yahay ugaarsiga ugaarta waaweyn ayaa sidoo kale lagu sharraxay Xeerarka Ugaarsiga iyo Dabashada. Daabacaadaha/noocyada sannadka cusub waxay diyaar noqon doona horraanta Agoosto.

Markaad diiwaangelinayso oorsatada waxa lagaa rabaa inaad *aaga rukhsadaha deerada* la timaado meesha oorsatada laga soo qabsaday oo laga heli karo khariiradda ugaarsiga deerada 2023, taas oo sidoo kale la heli karo Agoosto. Waxaad sidoo kale isticmaali kartaa Jiheeyaha Madadaalada - Guji sumadda dejinta ⚙ si aad u soo kiciso aagaga Deerada ama Oorsatada.

*Xasuuso – Aagga Ogolaanshaha Oorsatada 451: 2020-dii isbeddel ayaa lagu sameeyay aagga rukhsadda oorsatada ee 45. Qaybta koonfureed ee aagga rukhsadda oorsatada 45 ayaa la sii kala qaybiyay si loo sameeyo aagga rukhsada oorsatada (451) si loo sahlo helitaanka aagag

**TAARIIKHO MUHIIM AH:**

Waqtiga kama-dambeysta ah ee bakhtiyaa-nasiibka - May 5, 2023

Waqtiga kama-dambeysta ah ee iibsashada shatiga ee guulaystayaasha xilliga Oorsatada – Agoosto 1, 2023

Shatiyada aan la gadin ee iibka u diyaarka ah - Qof kasta oo u qalma - Duhurka, Agoosto 4, 2023

Aagga 451* – Agoosto 4, 2023

Biloowga dabitaanka – Agoosto 11, 2023

Xilliga oorsatada - Sibteembar 1 - Oktoobar 15, 2023

ugaarsi oorso dheeraad ah. In kastoo ay weli tahay Aag "Kooto", ugaarsadayaasha oorsatada ee Aaga 451 uma baahna inay bakhtiyaa-nasiibka codsadaan.  Shatiyada Aagga 451 laguma baxsho bakhtiya nasiib dheelis, LAAKIIN waxa heli doonaa keliya ugaarsadayaasha u qalma laga bilaabo Agoosto 5.

## U QALMISTA, NOOCYADA SHATIGA, IYO KHIDMADDA SHATIGA

Ugaarsadayaasha u qalma: Labada nooc ee shatiyada (kootada iyo ka aan kootada ahayn) waxay waajibinayaan in dhammaan shaqsiyaadku (kuwa deegaanka ah iyo kuwa aan ahayn) ay  ugu yaraan 10 sannadood jiraan ka hor ugaarsashada iyo in aanan horey looga joojin xuquuqdooda ugaarsiga ugaarta waaweyn si waafaqsan M.S. Qaybta 97A.421. Intaas waxa dheer, qof kasta oo dhashay Dis. 31, 1979 ka dib oo da'diisu tahay 12 sannadood ama ka weyn, waa inuu haystaa Shahaadada Badbaadada Hubka (ama wax u dhigma), ama caddeymo kale oo muujineysa inuu si guul leh u dhameystiray koorsada badqabka ugaarsiga si uu u helo shatiga ugaarsiga oorsatada.

Noocyada Shatiga: Waxa la heli karaa laba nooc oo shatiyada ugaarsiga ah:

1) *Rukhsadda Aagaga Kootada*: Wadar 4,035 rukhsadood ah ayaa lagu soo bandhigay hab bakhtiya nasiib ah oo ka dhacaysa 14 aag rukhsadeed. Waqtiga kama dambeysta ah ee codsashada Rukhsadaha Aagga Kootada waa 6da Maajo. Ugaarsadayaasha guuleysta waxa ogeysiinta loogu soo diri doonaa kaarka boostada bisha Maajo dhexdeeda, ama waxay sidoo kale natiijadooda ka eegi karaan bogga bakhtiya-nasiibka bartamaha Maajo. Ugaarsadayaasha guuleystay waxay shatiyadooda gadan karaan inta u dhexaysa Juun 1 iyo Agoosto 1. Ugaarsadayaasha wata shatiyada aagaga rukhsadda Kootada waxa loo ogol yahay inay ugaarsadaan oorsatooyinka jooga aagga rukhsadda ee ku qoran shatigooda oo keliya. (Aagaga Kootada waxa ka mid ah Aagga 451, hase ahaatee, tirada shatiyada ee aagaasi ma xaddidna, oo wax bakhtiya nasiib ah looma baahna.) Doorbidis**laguma soo** dari doono sannadkan haddii codsaduhu ku guuleystay bakhtiya nasiibka (xulashada koobaad ama labaad) balse aanu gadan shatiga.
   **Wakhtiga *Kama Dambeysta ah ee Gadashada Shatiga*** Guuleystayaasha bakhtiya-nasiibka oorsatadu waa inay shatiyadooda gataan ka hor Agoosto 1, 2023. Shatiyada aan la iibin iyo wixii dheeraad ah waxa intaas ka dib la heli doonaa 4-ta Agoosto, 2023, saacadu markay tahay 12:00 (duhurnimo) oo wuxu qof kasta oo u qalma ka gadan karaa iibiyaha shatiga ama onlaynka (taleefan ahaan maya). Caadiyan waxay ku dhammaadaan muddo daqiiqado ah.

2) *Aagaga Aan Kootada Ahayn*: Tiro rukhsado ah oo aan xaddidneyn ayaa si toos ah looga gadan karaa goobaha iibiyaha si oorsada looga ugaarsado Aagga Aan Kootada Ahayn, oo ah qaybta gobolka ee ka baxsan Aagga Rukhsadda Kootada. *Shatiyada Aagga Bilaa Kootada ahi waxay ka shaqeeyaan Aagga Bilaa Kootada Ah oo Qura!* Markaad gadaneyso shartiga oorsatada Aagga Bilaa Kootada ah waxa lagu weydiin doonaa "qaybta ugaasiga" ee ka tirsan Aagga Bilaa Kootada ah ee aad dooneyso

inaad ka ugaarsato. (Tani waxay waafaqaysaa aagga rukhsadda *deerada* – eeg khariiradda ugaarsiga deerada 2023 ama Jiheeyaha Madadaalada. Guji giraanka dejiyaha si aad u soo dulsaarato Aagaga Rukhsadda Deerada.) Waxaad u baahan doontaa inaad oorsatadaada diiwaangeliso adigoo isticmaalaya aagga/qaybta Rukhsadda Deerada. Way ka saxsanyihiin aagaga rukhsadda ee ballaaran.

*XASUUSNOOW: Waa sharci inaad gadato hal shati kooto iyo hal shati oo bilaa kooto ah isla hal sannad. Waad soo dilan kartaa oorso adigoo isticmaalaya mid kasta oo ka mid ah shatiyadaas, balse keliya waxa la ogol yahay hal kooto ah iyo hal bilaa kooto ah sannadkiiba.*

*Haddii qofku rabo keliya inuu kasbado dhibco doorbidiseed balse aanu dooneyn in lagu daro bakhtiya-nasiibka sannadkan, way codsan karaan balse waxay dooranayaa "Aagga 99." Maadaama aanu jirin wax Aag 99 ahi, lama dooran doono, balse waxay hal dhibic ku heli doonaan inay codsadeen.*

*Shatiga oorsatadu wuxu u baahan yahay in calaamad toos ah lagu dhejiyo xayawaanka. Haddii qofku shatigooda oorsada dhanka khadka ka soo gato ama taleefan ahaan, waa in boosto ahaan loogu soo diro, markaas u qoondee muddo illaa 10 beri ganacsiyeed ah ka hor xilligaad rabto inaad ugaarsato. Haddii aad isticmaaleyso moobil, waxaad u baahan doontaa inaad u beddelato "qaabka kombiyuutarka" si ikhtiyaarka shati gadashadu u muuqdo.*

### Khidmada Shatiga (oo ay ku jirto khidmadda soo saarista ee $1):

Qof deegaanka ah oo 18 jir ama ka weyn ah -- $45

Dhalinyarada - da'doodu tahay 10 - 12 waa inay helaan shatiga balse ma bixin doonaan wax khidmad ah.

Dhalinyarada jirta - da'da 13-17 -- $6.00

Dadka aan deegaanka ahayn oo 18 jira ama ka weyn -- $231.00

## XUDUUDAHA AAGGA OGOLAANSHAHA

Hubi inaad dib u fiiriso xuduudaha ka hor inta aadan u bixin ugaarsiga oorsatada si aad u hubiso inaad joogto aagii saxda ahaa. Eeg Khariiradda Ugaarsiga Oorsatada 2023, oo wixii tafaasiil dheeraada ahna isticmaal Jiheeyaha Madadaalada (Recreation Compass) (Guji summada Dejiyaha ee ku taala midigta fog, si aad u soo dulsaarato Aagaga Khariiradda Ugaarsiga Oorsatada AMA Deerad).

## SOO DABISTA OORSATADA

### Samaynta saldhigyada Dabinka :

Qofku ma dhisi karo, diyaarin karo, ka shaqeyn karo ama dhigi karo wax calaamad dabin ah ka hor Agoosto 12. Qofku saldhig dabin kama samayn karo in ujirta 100 yaardi gudahood goob horey dabin loo dhigay ka hor 12-ka Agoosto

Qofku oorsatooyin kama ugaarsan karo meel 100 yaardi u jirta saldhiga dabinta, ilaa uu diiwaangeliyo oo lagu calaamadiyo si waafaqsan shuruucda soo socota:

• *Calaamadaha Saldhiga Dabinka*: Qofka saldhig dabin ka sameeya meel (dhul guud ama mid gaar ah) waa inuu calaamad ka muujiyo goobta. Calaamada waa in laga sameeyo caag, loox, ama bir oo ay noqoto 6 iyo 10 inji cabbir ahaan. Dhulka dadwaynaha, cabbirkeedu kama weynaan karto 18 inji iyo 24 inji.

Calaamada waa inay ka koobnaadaan magaca iyo cinwaanka shati-wataha, Lanbarka shatiga darawalnimada ee shati-wataha, ama lambarka MDNR ee shati-wataha dabinka loo dhigay ~~dartiis~~. Haddii uu dhigay qof aan ahayn shati-wataha, calaamadda waa inay ka muuqdaan magaca buuxa iyo cinwaanka ama lambarka DNR ee Minisoota ama Lambarka Shatiga Darawalnimada Minisoota ee qofka dabinka dhigaya.

Xarfaha iyo lambarada waa in si sharci ah loo daabaco oo lagu buufiyo ama lagu xardho sheyga calaamadu ka sameysan tahay.

Calaamadaha saldhiga Dabinka waa in si muuqata dhulka looga kor qotomiyaa oo ay dhulka caadiga ah ka sareeyaan inta u dhexaysa 6 iyo10 fuud, waana in ay dabinka 20 fuud u jiraan.

Calaamadaha waa in lagu saaro 48 saacadood gudahood ka dib marka uu xirmo xilliga ooorsatadu.

Dhigista calaamado kale ama digniino lagu calaamadeynayo goobaha guud ee saldhigyada dabinada ama kula talinta dadka in saldhigyo dabineed lagu sameeyo dhulka dadwaynuhu waa mamnuuc.

** Shuruudaha Shatiga Dhigista Dabinada:* Qofna dabin oorsato ma dhigi karo illaa iyo in qofku haysto shatiga oorsatada ee 2023 maahee ama uu ka amar qaadanayo qof haysta shatiga oorsatada ee 2023. Haddii aad dhigeyso dabin uu leeyahay qof kale, waa inaad wadataa lambarkooda MDNR.

• Diiwaangelinta Saldhiga Dabinka:

## Dhammaan debinada waa in la diiwaangeliyo, iyada oo aan loo eegayn inay ku yaalliin dhul dadwayne ama mid gaar ah.

UGAARSADE kasta waxa loo ogol yahay keliya saddex saldhig dabin. (Xitaa haddii qofku haysto shatiga kootada iyo kan bilaa kootada ah labadaba, waxay haysan karaan saddex dabin keliya.) Qofna ma sameysan karo saldhig dabin isaga oo aan ka diiwaangelin DNR. Tani waxay sidoo kale ku dabbaqmeysaa markaad dhigeyso dabin uu leeyahay qof kale.

Waxa jira laba qaabo oo dabinka loo diiwaangeliyo:

a. *Diiwaangelin onlayn ah*: Qaab habboon oo aad saldhigyada debinka ku diiwaangelinayso waa isticmaalka kombiyuutarka bogga websaydka diiwaangelinta debinka oorsatada. Nidaamka diiwaangelinta waa la horumariyay waxa uuna ogol yahay in moobilka lagu isticmaalo oo wuxuna sahlayaa in debinka la diiwaangeliyo iyadoo la joogo goobta debinka. Nidaamkani wuxu ogol yahay in ugaarsade kasta oo shati leh diiwaangashado 3 debin oo keliya wuxuna diyaar noqonayaa horraanta Agoosto. Haddii dad badan ay wada ugaarsanayaan, sameyso kootooyin badan si aad u diiwaangelisaan wax ka badan 3 debin. Koonto kasta waxay u baahan tahay inay lahaato Lambarka Macmiilka DNR (MDNR), oo wata shatiga xilliga oorsada ee 2023 oo shaqeynaya.

   DNR waxay si adag u dhiirigelinaysaa isticmaalka bogga diiwaangelinta onlaynka ah, maadaama aanay ku tiirsanayn dirista boostada, oo liiska dabinkaagana ay fududahay in waxa uga beddelo. Si aad u isticmaasho habkan, samee koonto oo raac tilmaamaha ku yaal websaydka si aad u soo geliso ama wax uga badasho saldhigyada debinka.

b. *Diiwaangelinta Warqada*: Magaca, cinwaanka, lambarka MDNR, iyo lambarka taleefanka ee qofka sameeyay saldhiga dabinka iyo gobolka, degmada, aagga, iyo qaybta (ama rukumada (Coordinates) GPS) ee saldhiga debinka la sameeyay waa in boosto lagu diraa, xilli aan ka dambeyn maalinta xigta ee adeega boostadu shaqeynayo ka dib marka saldhiga debinka la sameeyo. Magaca iyo lambarka Minnesota DNR ee debinka sedka loo sameeyay waa in lagu soo daraa.

   Foomamka diiwaangelinta saldhiga debinka waa in boostada loogu diro cinwaanka ku habboon sida ku cad tilmaamaha foomamka ku yaal.

   Foomam badan ayaa loo isticmaali karaa dadka wada ugaarsanaya, balse keliya **3 debin ayaa loo diiwaangelin karaa halkii ugaaradaba.** Haddii dad badani ay wada ugaarsanayaan, oo la dhigo wax ka badan 3 debin, waa in 3-dii debinba lagu qoro foom diiwaangelineed gaar ah. Soo raaci macluumaadka looga baahan yahay ugaarsade kasta oo laga yaabo inuu ka ugaarsanayo goobta.

* Xadidka Saldhiga Debinka: ***Ugaarsade kasta oo shati haysta looma ogola inuu dhigto wax ka badan saddex saldhig dabineed halkii marba***. (Xitaa haddii ugaarsaduhu haysto shatiga kootada iyo kan bilaa kootada ah labadaba, waxay weli haysan karaan saddex debin oo keliya.) Haddii uu ugaarsade rabo inuu sameysto saldhig debin oo kuwii hore ka duwan, waa in mid ka mid ah saddexda saldhig ee ugaarsaduhu horey u lahaa la saaro. Si aad u saarto saldhiga debinka oorsatada oo horey u jiray, saar calaamadda

sedka oorsatada ee ku taal sedka laga tegay, oo dhameystir mid ka mid ah waxyaabahan soo socda –

a. Soo gal websaydka diiwaangelinta onlaynka ah ee oorsatada oo saar/ka tag saldhig debinka. Ama

b. Buuxi foomka diiwaangelinta debinka ee warqada ah si aad u soo sheegto saldhiga debinka ee laga tegay adigo gelinaya xogta gooobta ee ku habboon kuna calaamadinaya "laga tegay", dabadeedna diiwaangeli saldhig debineed kasta oo dhowaan la abuuray. Hagaha ugaarsiga oorsatada shatiga leh ee kasta wuxu sameyn karaa saddex saldhig debineed oo ka baxsan saldhigyada debinka ee loogu talagalay ugaarsadayaasha shatiga leh.

*Qeexitaanka Debinka: "Debinka" waa shey kasta oo loo dhigo in lagu soo jiito ama loogu waco oorsatooyinka. "Saldhiga debinku" waa goob kasta oo debin la dhigo si loogu ugaarsado. Waxyaabaha markasta uu ag joogo ugaarsaduhu looma tixgeliyo saldhig debin ahaan.

Waxyaabahan soo socda loomna isticmaali karo debinka oorsatada ahaan.

• Bakhtiga xayawaanka naasley ah oo ka kooban wax ka badan 25 boqolkiiba bakhtiga aan nadiifka ahayn.

• Hilibka naasleyda oo lafihii wata.

• Lafaha naasleyda

• Qashin adag oo ay ku jiraan dhalooyin, daasado, caag, waraaqo, ama bir.

• Waxyaabaha aan si fudud deegaanka ugu dhex burburi karin.

• Qayb kasta oo xubnaha doofaarka ah marka laga reebo hilib doofaarka la daweeyay.

Xasuusnoow: Foostada 55-ta galaan ah, baaldiyada, bacaha balaastika ah ee qashinka, ama weelalka kale keligood lagagama tegi karo saldhigyada debinka marka laga reebo foostooyinka yaal dhul gaar loo leeyahay iyo foostooyinka sharciga ah ee yaal dhulka dadwayne sida ku cad hoos:

Ku Isticmaalka Foostooyinka Dhulka Dadwaynaha: *Qofka deegaanka* ahi wuxu foosto ku dhigan karaa dhulka dadwaynaha balse waa inuu ka bixiyaa $5 oo kharash dheeraad ah foostadiiba. Ugaarsadayaasha deegaanku waxay xuquuqda foostooyinka oorsatada ka heli karaan meel kasta oo lagu gado shatiyada ugaarsiga, onlaynka, ama taleefan ahaan. Saldhigyada debinku waxay weli ku xaddidan yihiin wadar ahaan saddex saldhig calaa qof kasta ama ugaarsade oorsato kasta oo shati haysta. "Foosto" wuxu la macno yahay foosto qaada 30 galaan ama wax ka weyn.

Shuruudaha dhigista foostada goobaha dadwaynaha:

• Foostada waa in lagu xiro geed si aanay oorsatadu goobta uga dhaqaajin oo waa inaanay yeelan aalad makaanikeed oo cunto lagu baxsho.

• Foostada waa in loo diiwaangeliyo si la mid ah sida laga rabo in debinka loo diiwaangeliyo, oo ay ka mid tahay in la qoro xogta GPS ee goobta foostadu taallo.

• Calaamadda waajibka ah ee goobta debinka, foostada lafteeda waa in lagu calaamadiyo

1) magaca iyo cinwaanka shati-wataha;

2) lambarka shatiga darawalnimada ee shati-wataha; ama

3) lambarka MDNR ee la soo siiyay shati-wataha ugaarsadaha oorsatada ama hagaha ugaarsadayaasha ee shatiga leh.

• Waxa dhici karta in xaddidaado la saaro in foostooyinka debinka oorsatada la dhigo dhulka dadwaynaha ee u furan ugaarsiga (sida dhulka degmada ama federaalka). Si aad u hubiso inay sharci tahay in la isticmaalo foosto, ka soo hubi waaxda maareynta dhulka ee deegaanka.

• Foostada lama dhigi karo kahor taariikhda sharciga ah ee debin dhigista waana in lagu saaro todobo beri gudahood ka dib marka uu dhammaado xilliga oorsatadu.

Isticmaalka foostooyinka ee dhulka gaarka ah. Mulkiilaha dhulka gaarka ah ama qof mulkiilaha dhulku ogolaansho siiyay ayaa isticmaali kara foosto si uu debin ugu dhigo oorso dhulka gaarka ah ee qofkaas. Foostada waa in loo diiwaangeliyaa si la mid ah sida loo diiwaangeliyo saldhigyada debinada. Foostada waa in lagu xiro geed si aanay oorsadu goobta uga dhaqaajin oo waa inaanay yeelan aalad makaanikeed oo cunto lagu baxsho. “Foosto” wuxu la macno yahay foosto qaada 30 galaan ama wax ka weyn. Foostada waa in lagu calaamadiyaa mid ka mid ah kuwan soo socda:

1) magaca iyo cinwaanka shati-wataha; ama

2) lambarka shatiga darawalnimada ee shati-wataha; ama

3) lambarka “MDNR#” ee la soo siiyay shati-wataha ugaarsadaha oorsatada ama hagaha ugaarsadayaasha ee shatiga leh.

• Bixinaha Kale ee Debin-dhigista:

* Qofku waa inaanu saldhig debin ka sameyn meel u jirta 150 yardi xero horey sameysnayd.

* Qofku waa inaanu saldhig debin ka sameyn gudaha Aagga Rukhsadda Oorsatada 22 (Xuduuda Biyaha Aagga Huudhiga iyo qaybta BWCAW ee ka baxsan Aagga Rukhsadda Oorsatada 22).

*Qofku saldhig debin kama sameysan karo ama ma gayni karo oorsato meel mayl barkii u jiraa goota qashin-qub (ama saldhig wareejineedka).

## DAASASKA LA QAADI KARO EE AAGAGA MAAREYNTA DUURJOOGTA (WMAs)

Ka hor maalinta furitaanka (9/16/2023) ee xilli qaanseedka deerada, qofka haysta rukhsada oorsatada shaqeynaysa ee ka ugaarsanaya meel 100 yaardi u jirta goobta debinka oorsata ee si sharci ah u caalaamadsan oo u diiwaangashan daasaska la qaadi karo wuu kaga dheelman karaa habeenkii aaga maareynta duurjoogta. Magaca iyo cinwaanka shati-wataha ama lambarka shatiga darawalnimo waa in loogu dhejiyaa daasaska qaab laga soo akhrin karo dhulka.

## TAARIIKHAHA XIILIYADA, SAACADAHA TOOGASHADA, IYO XADADKA BOORSADA

Taariikhaha Xilliga: Xilliga ugaarsiga oorsatadu waa Sibteembar 1 - Oktoobar 15, ee dhammaan Unugyada Maareynta Oorsatada ee gudaha Aagga Bilaa Kootada.

Saacadaha Toogashada *:* Saacadaha toogashada ee sharciga ah waxay ka bilaabmaan nusa-saac ka hor qorrax soo baxa iyo nusa-saac ka dib qorrax dhaca.

Xadka Boorsada: Xadka boorsada waa hal oorso aagaga kootada *iyo* hal oorso oo aagaga bilaa kootada ah muddada sannadka oo dhan iyadoon la eegaynin in hub ama qaanso iyo leeb la isticmaalay. Oorsooyinka la dilanayo waxay noqon karaan jinsi iyo da’ kasta marka laga reebo oorsooyinka dhallaanka ah. Oorsooyinka dhallaanka ah waxa lagu qeexaa oorsooyinka ka yar hal sano jir.

## CALAAMADEYNTA, DIIWAANGELINTA, & SOO GUDBINTA ILIGA OORSATADA

Calaamadeynta Goobta: Qofka toogta oorsatada waa inuu ku calamadiyo calaamadda goobta ee la socota shatiga ugaarsiga oorsatada ee qofka la siiyay. Calaamadda goobta waa in lagu gijiyo laabta (shafka) oorsatada, dhegta laga dhex dusiyo, ama lagu xiro lafta lugta ama seed, loona xiro qaab calaamadda aan loo jari karin. Eeg qaybta calaamadeynta deerada ee Buug-gacmeedka Shuruucda Ugaarsiga iyo Dabitaanka si aad u hesho tilmaamaha calaamadeynta. Hayso mindi, xarig yar ama waayir, iyo calaamadiye aad ku xaqiijiso lambarkaaga. Calaamaddan waa in ugaarsaduhu sii haysto oo waa in lagu dhejiyo oorsatada ka hor intaan lagu ridin gaariga ugaarsadaha ama laga soo laalaadin xerada.

Xaqiijin: Waxa laga rabaa inaad xaqiijiso calaamadda goobta adigoo soo gelinaya ama qalin ku calaamadaynaya taariikhda dilitaanka, jinsiga oorsatada, iyo inaad ku dishay rasaas ama qaanso iyo leeb Calaamadda goobta waa in lagu ansixiyo goobta dilitaanka ka hor intaan xayawaanka sinnaba looga dhaqaajin goobta dilitaanka.

Diiwaangelinta iyo Soo-gudbinta Iligga: Qofka soo disha oorso waa inuu muddo 48 saacadood gudahood ah ka dib dilista ku keeno saldhiga diiwaangelinta oorsatada si loo diiwaangeliyo oo qaato Caalamadda Haysashada Ugaar Weyn. **Xasuusnoow: dhammaan saldhigyada diiwaangelinta ugaarta waaweyn maaha kuwo diiwaangeliya oorsatada. Waa muhiim inaad fiiriso [liiskan dhammeystiran ee saldhigyada diiwaangelinta oorsatada].** Calaamadda haysashada waa in oorsatada loogu dhejiyo si la mid ah sida calaamadda goobta ka hor intaan

xayawaanka laga qaadin saldhiga diiwaangelinta. Oorsatooyinka waxa sidoo kale lagu diiwaangelin karaa taleefan ahaan (888-706-6367) ama onlayn ahaan (Safka bidix ee bogga oorsatada ee guud ka raadi “Diiwaangeli Ugaar La Soo Dilay”), balse waa inaad sidoo kale tagto saldhig diiwaangelineed oo ka soo qaadato baqshad ilkeed. Diiwaangelinta waa in la sameeyo waqti aan ka dambeyn 48 saacadood ka dib marka xilligu xirmo.

## Habraacyada Diiwaangelinta iyo Soo-gudbinta Iligga

Oorsato kasta waa in la diiwaangeliyo. Xaalad kasta oo dhacda, oorstaada waa in lagu diiwaangeliyo muddo 48 saacadood gudahood ka dib marka la dilo ka hor intaan oorsatada looga hawlgelin qaab gaar ah ama ganacsiyeed. **Waxaad u baahan doontaa inaad ogaato lambarka saddexda god ah ee aagga rukhsadda deerada si aad u sheegto halka oorsatada lagu toogtay.** *Eeg Khariirada Rukhsadda Deerada, ama isticmaal Jiheeyaha Madadaalada. Guji aykan setingiska ee si aad u soo kiciso aagaga Deerada ama Oorsatada.* Waxa jira saddex ikhtiyaar oo diiwaangelineed:

1. *Goobaha diiwaangelinta ee tooska loo yimaado* Nidaamkan waxba lagama beddelin qaabkiisii sannadadii hore. Saldhigyada diiwaangelinta oorsatadu waxay ku qoran yihiin websaydka DNR. Qofka calaamadiisu ku taallo oorsatadu waa inuu shaqsiyan u keeno oorsatada saldhiga diiwaangelinta ee rasmiga ah oo uu helaa calaamadda haysashada ugaarta weyn. Calaamadda waa in lagu dhejiyaa laabta, lugta, ama dhegta halkii calaamadda goobta horey loogu dhejiyay. Sidoo kale, isla markaas waa INAAD soo qaadato baqshad iliga oo soo u soo gudbisaa si waafaqsan tilmaamaha DNR.

2. *Taleefan.* Nidaamka otomaatiga ah wuxu aqbali doona xog fureyaal lagu soo geliyay ama cod (tus. riix ama dheh 1). Waxa lagu weydiin doonaa inaad qorto lambarka xaqiijinta markaa waa inaad haysataa qalin si aad u dhamaystirto nidaamka diiwaangelinta. Si aad oorsatadaada u diiwaangeliso adigoo isticmaalaya nidaamka taleefanka, raac tallaabooyinka hoose. Tallaabooyinkani waxay sidoo kale ku daabacan yihiin shatigaaga.

    A. Wac 1-888-706-6367 si aad u gasho nidaamka

    B. Geli Lambarka Soo Dilashada ee ka kor u muuqda shatiga. Waa lambar 9-god ah oo dib kuugu xirayaa qofka iyo nooca shatiga. Kani waa lambar far ballaaran oo Far waawayn ku qoran oo ku yaal shatigaaga oorsatada MANA ahan lambarkaaga MDNR.  Lambarka diiwaangelinta ugaarta la soo dishay waxa la isticmaali karaa hal mar oo qura. Nidaamku ma aqbali doono in hal lambar dhowr jeer la diiwaangeliyo.

    C. Geli lambarka 3-da god ah ee aagga rukhsadda deerada ee oorsatadu lagu soo dilay. Nidaamku wuxu aqbali doonaa aagaga rukhsadda deerada oo qura. Haddii aadan si fiican u aqoon aagagaas, khariiradda aagaga rukhsadda deerada waxaaad ka heli kartaa websaydka MN DNR ee mndnr.gov.

D. Geli taariikhda oorsatada la dilay.

E. Geli noocaa oorsatada - Lab weyn ama dheddig weyn

o Lab weyn – Sharci ah (aan dhallaan ahayn) oorsato lab

o Dhedig weyn – Sharci ah (aan dhallaan ahayn) oorsato dheddig ah

F. Nidaamku wuxu intaas ka dib ku siin doonaa lambarka xaqiijinta oo ay tahay in shatiga looga dul qoro meesha ku  haboon.

3*. Interneed.* Tag mndnr.gov/hunting si aad u diiwaangeliso oorsatadaada. Su'aaluhu waxay la mid noqon doonaan kuwa diiwaangelinta taleefanka. Waxa lagu siin doonaa lambar xaqiijineed, kaas oo ay tahay in lagu dulqoro shatiga iyo calaamadda goobta.

Macluumaadka khaaska ah oo loogu talagalay diiwaangelinta oorsatada ee taleefanka iyo internet-ka

• Haddii aad isticmaasho diiwaangelinta Taleefanka ama Internetka, waa INAAD dhammeystirtaa diiwaaangelinta oo baqshadda iligga ka soo qaadato saldhiga diiwaangelinta oorsatada, mudo aan ka dambeyn 48 saacadood ka dib xiritaanka xilliga.

## Soo Gudbinta Illiga:

**Soo gudbinta illigu waa waajib. Fulintaan la'aanteedu waa xadgudub ka dhan ah Sharciga Ugaarta iyo Kalluunka ee Minnesota ee (MS 97B.411).** Cilmi-baarayaasha DNR ayaa xogta laga helo iliga oorsatada u adeegsada inay kula socdaaan tirada oorsatada. Qof kasta oo oorsato soo dishey waa inuu ilig u soo gudbiyaa DNR (tilmaamaha ka kor eeg baqshadda iliga). Baqshado qarashkooda boostada la baxshey oo iliga oorsada loogu dirayo DNR ayaa lagu baxshaa saldhigyada diiwaangelinta oorsatada. Qof kasta oo dila oorsato isaga ayaa ka masuul ah inuu baqshadda boostada ugu diro DNR. Dhammaan dadka soo gudbiya muunada iliga, ka hor Noofeembar 1, waxa loo soo diri doonaa macluumaad ku saabsan da'da oorsatada iyo calaamada la shaqeynta oorsatada ee Maajada sannadka soo socda.

Raac tilmaamaha ku kor yaal baqshadda iligga si aad u soo gudbiso iligga oorsatada. Tilmaamaha muunadaha iligga iyo liis dhammeystiran oo saldhigyada diiwaangelinta oorsatada ayaa laga helayaa bogga websaydka ugaarsiga oorsatada ee DNR.

Haddii aad baqshadda iligga ka soo weydo saldhiga diiwaangelinta oorsatada, waxaad Xarunta Macluumaadka DNR ka wici kartaa (651-296-6157 ama 888-MINNDNR) ama Cilmi-baarista Duurjoogta ee MN DNR 218-328-8872; waxay ku soo diri doonaan baqshad. Ama waxaad raaci kartaa tallaabooyinkan soo socda:

Aad u nadiifi iligga oo ku rid bac siib leh, ku duub tiish ama duubka alaminiyamka. Ku soo dir boosto isagoo wax jilicsan ku duuban oo aad soo raacisay dhammaan macluumaadka ku habboon (soo raaci nuqul macluumaadkaaga diiwaangelinta oorsatada ah) cinwaanka: DNR Wildlife Research, Minnesota DNR, 1201 E. Highway 2,

Grand Rapids, MN 55744. Baqshadda noocan ahi waxay u baahan doontaa kharash boosto oo ka dheeraad ah waraaqaha caadiga ah.

## OORSATOOYINKA DHIBTA LEH

Oorsatooyinka rabashka leh waxa ugaarsan kara ugaarsadayaasha shatiga haysta ka hor ama ka dib xilliga ugaarsiga aagga shatigu ka shaqeynayo haddii Maamulaha Duurjoogta ee DNR ama Sarkaalka Ilaalintu ogolaado. Oorsatooyinka rabashka leh ee uu dilo ugaarsade haysta shati ka baxsan xilliga ugaarsiga waa in aagga rukhsadda ee laga soo ugaarsaday loogu diiwaangeliyo sida caadiga ah. Ugaarsadayaashu waa inay muddo 48 saacadood gudahood ah ka dib markay oorsatada dilaan kula xiriiraan Maamulaha Doorjoogta ama Sarkaalka Ilaalinta. La xiriir Xafiiska Duurjoogta Maxalliga ah ee aagga aad ka ugaarsaneyso, si laguu geliyo liiska helitaanka haddii aad xiiseynayso inaad ugaarsato oorsatooyinka rabashk leh.

## HAGITAANADA/ DUKAAMADA OORSATADA

Qofna debin oorsato ma dhigi karo ama ma hagi karo ugaarsadayaasha isagoo khidmad ka qaadaya isagoo oo aan marka hore soo qaadan Shatiga Hagaha Ugaarsiga Oorsatada ($82.50, dadka deegaanka oo keli ah) ama Shatiga Hagaha Ugaarsiga Oorsatada ee Sarre ($165.00, dadka deegaanka oo keli ah). DNR waxay shahaadada caafimaadka haga ugaarsadaha oorsatada bixisaa hal mar sannadkiiba. Tani caadiyan waa Juun ama Luulyo. Si laguugu daro liiska ogeysiinta marka fasalku u qorsheysan yahay sannadka soo socda, fadlan iimayl u dir info.dnr@state.mn.us, oo codsigaaga waxa loo sii gudbin doonaa kooxda oorsatada. Fadlan soo raaci lambarka taleefankaaga si macalinku u helo qaab kale oo uu kuula soo xiriiro haddii loo baahdo.

## MAMNUUCYADA KALE

Ugaarsi kooxeedka: Wax ugaarsi kooxeed ah lagama ogola ugaarsiga oorsatada. Tani waxay la macno tahay inaanu jiri doonin ugaarsade oorsato u dili kara ugaarsade kale, oo ugaarsadayaashuna waxay calaamadin karaan oorsatada, ay iyagu laf ahaantooda, disheen.

Oorsatooyinka Cad: Oorsato cad waa inaan la ugaarsan.

Oorsatooyinka Dhallaanka ah: Oorsatooyinka dhallaanka ah waa inaan la ugaarsan.

Hoyga Xayawaanka: Waa inaan la ugaarsan oo la qashqashin oorsato kasta oo ku jirta gabbaadka/hoyga xayawaanka.

Isticmaalka Eyda: Qofku wuxu ey u adeegsan karaa si uu uhelo ama usoo saaro deero ama oorso dhaawacan sida soo socota:

- Qofka raadinaya inuu helo xayawaanka waa inuu haystaa shati shaqeynaya oo uu ku ugaarsado deerada ama oorsatada.
- Dadka wada eyda ee aan haysan shati waa inuu la socdaa ugaarsade shatigiisii ugaarsiga wata.
- Ugaarsadaha shatiga wata iyo qofka eyga wada waa inay lugeynayaan oo ay xiran yihiin maro bidhaameysa oo basali ah.

- Iftiin kasta oo qofku wato waa inuu noqdo mid macmal ah oo gacanta lagu sito ama lagu dhejiyay qofka.
- Waa in eygu ku xiran yahay xarig aan ka dheerayn 30 fuud. Ugaarsadaha ama qofka eyga wada waa inay markasta xakamaha u hayaan eyga.
- Magaca iyo lambarka taleefanka ee milkiilaha eygu waa inay ku qoran yihiin eyga marka loo adeegsanayo in lagu helo deero ama oorsato dhaawacan.
- In eyga si kale loogu adeegso ugaarsiga oorsatada waa mamnuuc.

Xaddidaada Qaansooyinka-Hubka/Rasaasta: Waa sharci inaad oorsatada ku ugaarsato qaanso iyo leeb adigo haysta hub.

Sii kala Qaybinta Oorsatooyinka ka Hor Diiwaangelinta: Oorsatooyinka haraga ayaa laga saari karaa, waa la sii waaxyayn karaa, ama waa loo sii kala qayb qaybin karaa ka hor intaan la qaadin oo la diiwaangelin, balse dhammaan hilibka la cuni karo ama qaybaha uu ugaarsaduhu la harayo waa in la keenaa isku mar si loo diiwaangeliyo.

Iibinta Hilibka, Xubnaha, iyo Qaybaha: Lama iibin karo hilibka ama xubnaha (oo ay ku jiraan kaadi-haysta) oorsatada. Waad iibin kartaa ilkaha, madaxa, lafaha, saamaha, ama ciddiyaha oorsato sifo sharci ah lagu soo ugaarsaday. Ma iibin kartid cagaha oorsatada, illaa iyagoo haraga ku dhejisan maahane.

RUKHSADAHA DHOOFINTA EE CITES Ganacsiga saamaha oorsatada madoow (hargaha iyo dhogorta), ciddiyaha, madaxyada, ama ilkaha, waxa xakameeya sharciga federaalka iyo heshiiska caalami ah.

## BAABUURTA RAFKA (OHVS), OO AY KU JIRAAN KUWA MARI KARA BANNAANKA IYO BUURAHA (ATVS)

Qofna xayawaan duurjoog ah kama soo toogan karo OHV.

Qofna si ula kac ah baabuurta rafka loogu talagalay uguma wadan karo:

- goobaha maareynta duurjoogta badankooda, seeraha gobolka, aagaga sayniska ama dabiiciga ah, marka laga reebo meelaha uu sharcigu si khaas ah u ogolaaday;
- biyaha aan barafoobin ee dadwaynaha (harooyinka, webiyada, durdurada iyo dhulka biyo fadhiisinka ah), ama
- xeryaha guddoomiyuhu u aqoonsaday inay didib/nuurad leeyihiin;
- waddooyinka dhulka dadwaynaha ee loo qoondeeyay ama lagu calaamadeeyay keliya inaan baabuur loo isticmaalin;
- goobaha xaddidan ee ku yaal dhulka dadwaynaha ee la calaamadeeyay ama meelaha leh iriddo ama qaab-dhismeedyo kale oo muuqda oo lagaga joojinayo inay baabuurtu gasho

## Meelaha laga reebay Ugaarsiga/Dabin-dhigista Keynta Gobolka (Reebitaanadani kuma dabbaqmayaan debin u dhigista oorsatada ee Agoosto iyo Sibteembar)

In lagu safro waddooyinka rafka ah iyo xagaafyada (safarka miyiga/keymaha laga dhex gudbayo) ee keymahada gobolka ee XADDIDAN ama waddooyinka aan laamiga ahayn, kuwa rafka ah iyo marinada keymaha MAAREYSAN ee gobolka waa ka mamnuuc dadka illaa qof haysta shatiga ugaarsiga, dabashada ama dabasho ganacsiyeed oo wata baabuur yaraha ATV ee Heerka I oo keymaha ku dhexmarayo maahane:

- La soo bax ugaar weyn (Sibteembar illaa Diiseembar).
- Ugaarso ugaarta waaweyn oo dhiso daasas (Oktoobar illaa Diiseembar).
- Dabo xayawaanada dufka/dhogorta leh inta lagu jiro xilliga furan
- Ku dabo kalluunka miinowsshuruudo xadidan.